



HAGAHA TIGIDKA 2023 BARNAAMIJKA MARINKA BULSHADA

GUUDMAR

Hambalyo inaad ahaato la-shaqeeye Barnaamijka Marinka Bulshada (CAP) ee 2023! Aad baan ugu faraxsannahay in aan iskaashi kula sameyno sanadkaan si loo siiyo shaqsyaadka aad u adeegto gelitaanka Beerta Xayawaanka Woodland Park. Maadaama aad tahay la-shaqeeye Barnaamijka Marinka Bulshada, waxaad heleysaa tigidyo shaqsi oo elektaroonig ah (dhijital) oo ku imaanaya qaabka koodhadhka dhiirigelinta iyo/ama tigidyo kooxeed. Koodhadhkaan dhiirigelinta iyo tigidiyada kooxeed waxaa laguugu soo diray iimeelka.

Dhokumentigaan waxaa ku jira:

1. Tilmaamaha sida loo qeybiyo loona sarrifto tigidiyada shaqsi
2. Tilmaamaha sida loo isticmaalo tigidiyadaada kooxeed, haddii aad heshay iyaga
3. Xaashida Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo oo su'aalo badan looga jawaabay
4. Guudmar hal bog ah

Haddii aad qabto wax su'aalaa, fadlan ka labalabeyn inaad nagala soo xiriirto cap@zoo.org.

TIGIDYADA SHAQSIGA

Haddii aad codsatay tigidiyada CAP ee shaqsi, waxaad heshay xaashi Excel ah oo wadata liiska koodhadhka dhiirigelinta. Koodh kasta oo dhiirigelin ah wuxuu u dhigmaa labo (2) tigid ee gelitaanka guud. Waxaad u qeybin kartaa koodhadhkaan dhiirigelinta shaqsyaadka aad u adeegto, waxayna ka sarrifan karaan:

1. Khadka ee [bog-khadkeena tigid-bixinta](#) ama
2. Si toos ah irid kasta ee beerta xayawaanka

MASALKA
Koodhadhka
Dhiirigelinta
WPZ - 0893
WPZ - 0894
WPZ - 0895
WPZ - 0896
WPZ - 0897
WPZ - 0898
WPZ - 0899

Markii aad qeybineysid koodhadhka dhiirigelinta, waxaad u baahan doontaa inaad si taxaddar leh ula socoto koodhadhka dhiirigelinta ee aad qeybisay. Koodh dhiirigelin wuxuu shaqeeyaa halmar (1-isticmaal), sidaa darteed kadib markii la sarrifto, markale lama isticmaalo karo.

Haddii aad doorbideyso qeybinta tigidyo jir-ahaaneed, waxaan kuugu soo darnay sambal si aad u geliso koodhadhkaaga dhiirigelinta, ku daabacdo uguna qeybiso dadka aad u khidmeysyo. Sambalkaan waa ikhiyaari waxaana laguugu daray haddii tan waxtar leedahay.


TIGIDYADA SHAQSI KU SARRIFO KHADKA

Kadib markaad qeybiso koodh dhiirigelin oo siiso shaqsi, waxay ku sarrifan karaan koodhkooda tigid bilaash ah oo beerta xayawaanka lagu galo ayadoo la isticmaalayo bog-khadka tigid-bixinta beerta ee www.zoo.org/visit. Bog-khadkaan waxaa isticmaala martida oo dhan kuwaasoo doonaya in ay gataan tigidyo khadkaa. Heleyaasha waxaa loo soo diri doonaa iimeel wata tigid dhijitaal ah oo ay keeni doonaan beerta xayawaanka si ay u galaan.

Fadlan hoos ka hel tilmaamaha sida loo sarrifto koodh dhiirigelin ee tigid CAP ah.

1. Ka gal bog-khadka tigid-bixinta beerta <https://www.zoo.org/visit> ama <https://tickets.zoo.org/events>
2. U dooro 'Daily Admission' tigidyada gelitaanka guud

Choose your events



3. Dooro taariikhda iyo waqtiga aad jeceshahay inaad booqato

Please select your time and date! You are able to arrive anytime after the time selected. The zoo stops selling tickets online two hours prior to close.

Select Tickets

Select a date

Today Tomorrow Pick a date

Select a time

10:00 AM 10:30 AM 11:00 AM 11:30 AM 12:00 PM 12:30 PM 1:00 PM
1:30 PM 2:00 PM

A screenshot of a ticket selection form. It starts with a "Select a date" section with buttons for "Today", "Tomorrow", and "Pick a date" with a calendar icon. Below that is a "Select a time" section with a grid of time slots from 10:00 AM to 2:00 PM. The 11:30 AM slot is highlighted with a yellow border, while others are greyed out.

4. Dooro Nooca tigidka (qof weyn iyo/ama ilmo) iyo tirada
5. Ku dar dalabkaaga
6. INTA AADAN gujin "proceed to checkout," **Guji 'Apply a Promo Code'**
7. Geli koodhkaaga dhiirigelinta CAP. Koodh kasta ee dhiirigelin wuxuu u dhigmaa labo (2) tigid waxaana la isticmaali karaa halmar oo keliya. Haddii aad gadaneyso wax ka badan labo tigid, waxaad u baahan doontaa inaad isticmaasho koodhadh badan oo dhiirigelin. Koodhadhka dhiirigelinta waxay tigidyada ka dhigi doonaan bilaash.

Order Summary

Reservation will expire in 9:37 min

Daily Admission
Wed, Sep 14, 2022 at 11:30 AM

3 x Adult (13-64) \$78.75

ORG6JHHTT **Apply**

Subtotal \$78.75
Discounts -\$52.50
CAP Codes

Order Total \$26.25

Proceed to Checkout

8. Guji 'Proceed to Checkout'
9. Buuxi bogga 'Payment Information' (macluumaadka lacag-bixinta) kaasoo aruuriya magac shaqsi, ciinwaan iyo iimeel. Uma baahnaan doontid inaad geliso faahfaahin lacag-bixin sida kaadh credit/debit ah.

Payment Information

Are you a member? [Log in](#) Not a member? [Sign up now](#)

Your Information

First Name
Caitlyn


Last Name
Hamilton

Address
5500 Phinney Ave N

City
Seattle

State
Washington

10. Guji 'Complete Order'



11. Waxaa laguu soo iimeel-gareyn doonaa tigidyadaada! Tigidyadaada waxaa ku jiri doona macluumaad ku saabsan gaari-dhigashada, tilmaamaha meel-gaarista, caawinta naafada, su'aalaha inta badan la isweydiyo ee martida iyo macluumaadka xiriirka ee taageerada.



Thank you for purchasing tickets to Woodland Park Zoo.

WOODLAND PARK ZOO SAVES WILDLIFE AND INSPIRES EVERYONE TO MAKE CONSERVATION A PRIORITY IN THEIR LIVES.

Your purchase supports Woodland Park Zoo's mission



TIGIDYADA SHAQSIGA KU SARRIFO QOF AHAAN

Haddii aad doorbidi lahayd in aadan isticmaalin boggeena khadka si aad u sii qabsato tigidyadooda, waxaan haynaa doorasho kale! Martidaada waxay keeni karaan koodhadhkooda dhiirigelinta daaqad kasta oo tigid-bixin/xubinnimo ee beerta xayawaanka, waxaana loo oggolaan doonaa gelintaan. Koodhadhka dhiirigelinta waxay u shaqeeyaan sida tigidyo dhab ah ee gelitaanka, waxaana rajaynaynaa tan in ay waxtar u leedahay shaqsyaadka aan awoodin in ay tigidyada ka sii qabsadaan khadka.

Fadlan hubi inaad keento tirada saxdaa ee koodhadhka dhiirigelinta ee loogu talagalay kulli dadka uga qeybgalaya kooxdaada. Tusaale ahaan, haddii saddex qof ay ka qeybgalayaan, waxaad u baahan doontaa inaad keento labo koodh oo dhiirigelin ah.

TIGIDYADA KOOXDA

Haddii aad codsatay tigidyo kooxeed, waxaa laguu soo diri doonaa iimeel wata tigid dhijital ah oo koodh QR ah leh. Tigidkaan wuxuu sax u yahay maalin iyo waqtii gooni ah. Haddii aad u baahantahay inaad beddesho taariikhda, waxaa jira doorasho ku taala tigidkaaga laguu soo iimeel-gareeyay si aad u beddesho taariikhda iyo waqtiga. Laakiin waxaad aadi kartaa boggeena khadka oo ka beddeli kartaa taariikhda iyo waqtiga. Annaku ma awodno in aan beddelno taariikhda iyo waqtiga booqashada kooxdaada.

Waxaa u isticmaali doontaa tigidkaan gelitaanka beerta xayawaanka. Si xor ah ula wadaag shaqsyaadka kale ee kooxdaada haddii aad qorshayneesaan gelid waqtio kala-duwan ama iridyo kala-duwan. Haddii shaqsyaadku si gooni gooni ah u soo galayaan, kulli shaqsyaadku waxay u baahan yihiin koobiga tigidka kooxda ee gelitaanka. Waa qasab tigidyo in lagu galo. Intaa waxaa dheer, haddii shaqsyaad dheeraad ah oo ka socda hay'addaada jeelaan lahaayeen inay soo galaan beerta oo ka badan inta ku qoran tigidka kooxdaada, waxay u baahan doonaan in ay gataan tigidyo dheeraad ah. Tusaale ahaan, haddii tigidka kooxdaada loogu talagalay 20 shaqsi hadana 22 shaqsi isku daydo inay imaadaan beerta, 2 shaqsi waxay u baahan doonaan tigidyo beerta in ay gataan.

ISTICMAALKA TIGIDKA

Tigidyadaan waxaa keliya oo loogu talagalay gelitaanka waqtii-maalinta ee beerta xayawaanka. Fadlan ogow tigidyadaan gelitaanka bilaashkaa ma loo isticmaali karo dhacdo kale oo khaas ah. Waxaad u qeybin kartaa tigidyadaan ka-qeybgalayaasha barnaamijkaaga ama u isticmaal booqasho kooxeed.

Tigidyadaan ma ahan in loo isticmaalo hadyado xayeyisiin, abaalmarino ama ujeedooyin lacag-aruurin. Hadafkeenu waa in tigidyadaan Barnaamijka Marinka Bulshada la siiyo shaqsyaadka hay'addaadu u khidmeyso si gacan looga geysa beerta in laga dhigo meel la geli karo oo khibrad fiican u ah iyaga.

SU'AALAH INTA BADAN LA-ISWEYDIIYO

Waxaan jeelaan lahaa in aan siiyo qoys 5 ah tigidyada CAP. Imisa koodhadhka dhiirigelinta ayay u baahan yihiin?

Waxaad u baahan doontaa inaad bixiso saddex (3) koodh oo dhiirigelin ah. Koodh kasta oo dhiirigelin wuxuu u shaqeyya sida labo (2) tigid ee gelitaanka guud, marka waxaad u baahnaan doontaa koodhadh ku filan oo dhiirigelin si loo daboolo 5 shaqsi. Koodhadh badan oo dhiirigelin waxaa la gelin karaa meesha bixitaanka, laakiin koodh kasta oo dhiirigelin halmar oo keliya baa la isticmaali karaa.

Haddii aan u soo saarno saddex koodh oo dhiirigelin qoys shan ah, hal tigid ma noqon mid aan la isticmaalin?

Haah, hal tigid ma la isticmaali doono. Fadlan ha ka labalabeyn inaad codsato tigido dheeraad ah inta lagu jiro muddooyinka codsiga u furan haddii kuwa dheeraad ah u baahato.

Waxaan jeelaan lahaa in aan doorto doorasho tigid leh caawin naafso ama tigid militari. Koodhadhka dhiirigelinta CAP ma u jiraan doorashooyinkaan?

Haah! Waxay diyaar u yihiin dhammaan tigidyada gelitaanka maalinta.

Waxaan u baahanahay in aan beddelo waqtiga aan u dooray tigidka kooxdeyda. Sidee ayaan u sameeyaa tan?

limeelka wata tigidka kooxdaada, waxaa ku dul-qoran qoraal dhahaya 'reschedule' oo leh batoon tigidkaaga waqt kale aad u qabato. Guji batoonkaas si aad u beddesho taariikhda iyo waqtigaaga booqashada kooxdaada.

Waxaan imaanaya waqtii ka duwan midka ku qoran tigidkeyga. Ma awoodi doonaa in aan galo?

Haah! Tigidyada CAP waxay awoodi doonaan in ay galaan waqtii ka duwan midka lagu sheegay tigidkooda. Tusaale ahaan, haddii tigidka loogu talagalay gelitaanka Juun 3'da, 10:30 a.m., tigid haystana uu imaado beerta xayawaanka Juun 2'da 10:30 a.m. ama Juun 3'da 1:00 p.m., waxaa loo oggolaan doonaa gelitaan.

Haddii aad tahay kaaliye qof toos u gacan qabta ama adeegaha marti naafooyin leh, ma u baahan doontaa tigid CAP ah ama ma laguu oggolaan doonaa gelitaan?

Maya, uma baahna tigid CAP ah si ay u galaan. Waxay ka sii qabsan karaan tigid kaaliye qof toos u gacan qabta oo bilaash ah khadka ama daaqaddeena tigid-bixinta.

Macluumaadkaan ma lagu helaa afaf kale?

Haah! Lasoo xiriir cap@zoo.org si aad u hesho macluumaadkaan iyo hagaha shaqsiga ee afafka kale. Waxaan sidookale haynaa fiidiowy (muuqaallo) luuqado badan ku sharra xaya hannaankaan.

Ma jirtaa sheeko bulsheed si qoysasku u sii ogaadaan waxa la fili karo iyo ilaha waxtarka leh ee caawinta naafada?

Haah! Fadlan u booqo boggeena www.zoo.org/access macluumaad dheeraad oo ku saabsan ilaha waxtarka leh ee caawinta naafada iyo sheekadeena bulshada. Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama walaacyo la xiriira caawinta naafada, fadlan kala xiriir Alexander Jones, Khabiirka Caawinta Naafada Alexander.Jones@Zoo.org. Alexander waxay ku faraxsan tahay in ay caawiso adiga iyo hay'addaada.

Tigidyadaan ma u isticmaali karaa ujeedooyin lacag-aruurin?

Maya, tigidyada Barnaamijka Marinka Bulshada ansax uma ahan ujeedooyinka lacag-aruurinta.

Ma u qeybin karaa tigidyadaan mutadawaciinta hay'addayada?

Tigidyada Barnaamijka Marinka Bulshada waa in ay aadaan shaqsiyaadka hay'ad u khidmeys. Waan ogsoonnahay kaalinta muhiimkaa ee mutadawaciintu hay'adaha ka qaataan, haseyeeshee, baahida

barnaamijkaan awgeed, tigidyada xaddidan ee aan hayno waa in ay marka hore aadaan shaqsiyaadka hay'ad u adeegto.

Ma jiraa qof jooga Beerta xayawaanka oo aan la hadli karo haddii aan qabo su'aalo ku saabsan barnaamijkaan?

Haah! Kooxdeena Arrimaha Bulshada waxay ku faraxsan yihii in ay ku caawiyaan. Fadlan nagala soo xiriir cap@zoo.org. Waxaan qaban karnaa waqtii wicitaan ama kulan loogu talagalay.

ONE-PAGE GUIDE

As a Community Access Program partner, you are receiving digital individual tickets in the form of promo codes and/or group tickets. These promo codes and group tickets have been emailed to you. Maadaama aad tahay la-shaqeeye Barnaamijka Marinka Bulshada, waxaad heleysaa tigidyo shaqsi oo dhijitaal oo ku imaanaya qaabka koodhadhkka dhiirigelinta iyo/ama tigidyo kooxeed. Koodhadhkaan dhiirigelinta iyo tigidyada kooxeed waxaa laguugu soo diray iimeelka.

INDIVIDUAL TICKETS

If you requested individual CAP tickets, you will have received an Excel sheet with a list of promo codes. Each promo code is valid for two (2) general admission tickets. You may distribute these promo codes to the individuals you serve, and they can redeem them either: Haddii aad codsatay tigidyada CAP ee shaqsi, waxaad heshay xaashi Excel ah oo wadata liiska koodhadhka dhiirigelinta. Koodh kasta oo dhiirigelin ah wuxuu u dhigmaa labo (2) tigid ee gelitaanka guud. Waxed u qeybin kartaa koodhadhkaan dhiirigelitna shaqsiyaadka aad u adeegto, waxayna ka sarrifan karaan:

1. Online on our ticketing website or Khadka bog-khadkeena tigid-bixinta ama
2. In-Person at any zoo entrance Si toos ah irid kasta ee beerta xayawaanka

When you distribute the promo codes, you will need to carefully track which promo codes you have given out. After a promo code is used one time, it cannot be used again. Markii aad qeybinesid koodhadhka dhiirigelinta, waxaad u baahan doontaa inaad si taxaddar leh ula socoto koodhadhka dhiirigelitna ee aad bixisay. Kadib markii koodh dhiirigelin hal mar la isticmaalo, markale lama isticmaalo karo.

Redeem Individual Tickets Online

After you have distributed a promo code to the individual, they may redeem their code for a free ticket to the zoo on the zoo's website. They will be emailed a digital ticket that they will bring to the zoo for admission. If technology is a barrier, your organization can purchase the ticket and print it for them. They can then bring the printed ticket to zoo for admission. Kadib markaad qeybiso koodh dhiirigelin oo siiso shaqsi, waxay ku sarrifan karaan koodhkooda tigid bilaash ah oo beerta xayawaanka lagu galo ayadoo la isticmaalayo bog-khadka beerta. Waxaa loo soo iimeel-gareyn doonaa tigid dhijitaal ah oo ay keeni doonaan beerta xayawaanka si ay u galaan. Haddii tiknoolajiyaddu caqabad tahay, hay'addaada waxay u gadi kartaa tigdika weyna u daabici iyaga. Markaasna waxay la imaan karaan tigidka daabacan beerta si ay u galaan.

Please find below instructions on how to redeem a promo code for a general admission ticket. Fadlan hoos ka hel tilmaamaha sida loo sarrifto koodh dhiirigelin ee tigid gelitaan guud.

1. Go to the zoo's ticket website at Ka gal bog-khadka tigid-bixinta beerta www.zoo.org/visit
2. Select the general admission ticket and the date and time you would like to attend. Dooro tigid gelitaan guud iyo taariikhda iyo waqtiga aad jeelaan lahayd inaad ka qeybgasho.
3. At checkout, enter the promo code(s) you have been given which will make the tickets free. You can enter multiple promo codes at one time. Markaad dhameysitrka, geli koodhka (yada) dhiirigelinta ee lagu siisay kaasoo ka dhigi doona tigidyada bilaash. Waxed halmar gelin kartaa koodhadh dhiirigelin oo badan.
4. You will be emailed your tickets! Your tickets will include information about parking, directions, accessibility, guest FAQs and contact information for support. Waxaa laguu soo iimeel-gareyn doonaa tigidyadaada! Tigidyadaada waxaa ku jiri doona macluumaad ku saabsan gaari-dhigashada, tilmaamaha meel-gaarista, caawinta naafada, su'aalaha inta badan la isweydiyo ee martida iyo macluumaadka xiriirka ee taageerada.

Redeem individual tickets in-person Tigidyada shaqsi ku sarrifo qof ahaan

Your guest can bring their promo code to any zoo ticketing/membership window, and they will be granted admission. Please ensure that they bring enough promo codes for all the people attending in their group. The promo codes act as physical tickets for entry. Martidaada waxay keeni karaan koodhadhkooda dhiirigelinta daaqa

kasta ee lagu bixiyo tigidyada beerta/xubinnimada, waxaana loo oggolaan doonaa gelitaan. Fadlan hubi in ay la imaadan koodhadh dhiirigelin oo ku filan dhammaan dadka ka qeybqalaya kooxdooda. Koodhadhka dhiirigelinta waxay u shaqeeyaan sida tigidyo jir-ahaaneed (dhab ah) ee gelitaanka loogu talagalay.

GROUP TICKETS TIGIDYADA KOOXDA

If you requested group tickets, you will be given a digital ticket with a QR code. This ticket is valid for a specific day, but you can go to our online website and change the date and time.

You will use this QR code for entry into the zoo. Feel free to share this code with other individuals in your group if you plan on entering at different times or at different entrances.